

# Buugeyga caafimaadka ee gaarka





**BUUGEYGA CAAFIMAADKA EE GAARKA**

**Ka dib nooca uu sameeyey:** Dr A Macfarlane, Oxford District Health Authority, England.

**Turjumaad iyo isku habeyn:** Gisela Kainz, Primärvårdens FoU-enhet, Landstinget i Jönköpings län.

**Waxa masuul ka ah nuxurka:** Barnhälsovårdens centrala utvecklingsteam Jönköping, vårdutvecklare Ann-Charlotte Lilja.

**Dib loo saxay kadib wadashaqeyn lala sameeyey:** Barnhälsovården, Jönköpings län landsting Ogosto 2016.

**Qaabeynta farshaxanka:** Parachute Communication

**Muuqaalada:** Cecilia Johansson

**Daabacaada:** SKL Kommentus AB

Dib u daabacista ayaa reeban.

# Hordhac

## Daryeelka caafimaadka carruurta – BVC

4

Ku socota dadka waalidka cusub ah	4
Buugan caafimaadka waxa leh	5
Telefoonada iyo Bogagga internetka ee muhiimka	6
Diiwaanka caafimaadka carruurta ee Iswiidhan	7

## Waxa wanaagsan in la ogaado booqashada BHV ka hor

9

Caafimaadka iyo koritaanka	9
Koriinka carruurta	10
Cuntada	12
Caafimaadka ilmaha	14

## Baadhitaanada caafimaadka iyo booqashada guriga

16

Booqashada koowaad ee guriga 0–14 maalmood	16
Baadhitaanada caafimaadka	17
Koox booqasho soo sameynaysa dhakhtar iyo kalkaalisada,	
2 1/2–3 sanno	18
3-4 bilood	18
5 bilood	19
6 bilood	20
7-10 bilood	20
12 bilood	21
18 bilood	22
2 1/2–3 sanno	23
2 1/2–3 sanno	24
4 sanno	25
5 sanno	26

## Bay'ada ilmaha

27

Su'aalo iyo jawaabaha ku sabsan cadceeda ku dhacaysa ilmah	28
Habka loo qoraxeysto ee haboon	29
Waxyaalaha la hubinaayo si loo helo bay'ad carruurta oo ka sugan	30
Calaamadaha in ilmahu wax cunaha galiyey:	33
Macluumaadka talaalada	34
Talaalada	35
Koritaanka	36

## Xiliga booqashada ee BVC

42

# Ku socota dadka waalidka cusub ah

(Till nyblivna föräldrar)

## Hambalyo!

Safar aad u xiiso leh ayaa hadda bilowdey. Ilmo yar ayaa u yimid qoyska. Haddii uu ilmahu yahay kii ugu horeeyey iyo haddii uu yahay walaal ku soo kordhey carruurta kale ayaa waxa hubaal ah in taasi keeni doonto isbedel hab nololeedka iyo waxqabadka joogtada ah ee qoyska. Waxaad wax badan ka ogaan doontaa ilmah yar iyo waxa laga yaabaa xataa adiga laftaada.

Waa inaad markasta dareento in lagugu soo dhaweynaayo BVC, da marka aad ka hadlayso wax werwer, waxyaalaha ku saabsan farxada ee la socda carruurta yaryar.

Waxaanu rajeynaynaa in buugan caafimaadku uu ku caawin doono adiga si aad ula socoto ilmaha caafimaadkiisa, koritaankiisa iyo horumarinkiisa laakiin inuu sidoo kale ku siiyo talooyin ku saabsan waxyaalaha caafimaadka leh ee la dooranaayo. Buugan ayaad adiga iyo dadka kale ee leh masuuliyada ilmahaagu aad wax ka akhriyi kartaan oo aad wax ka qori kartaan.

Buuga caafimaadka ayaa ah dokumentii muhiim ah. Markasta u soo qaado booqashada.

- BVC
- Dhakhtar jooga vårdcentralen.
- Cosbitaalka
- Daryeelka caafimaadka ilkaha

## **Dhamaan carruurta waxay ay xaq u leeyihiin daryeel caafimaadka oo lacag la'aan ah**

Waa xuquuqaha aasaasiga ee ilme kasta inuu helo daryeel caafimaad oo wanaagsan.

Waxyaalaha laguugu soo ban dhigaayo baadhitaanka caafimaadka ilmaha waxa ka mid ah, talaal iyo wada hadal ku saabsan caadooyinka nolosha ee ilmaha ilaa xiliga uu ka gaadhaayo da'da dugsiga. Halkan ayaa sidoo kale ka heli doontaa talooyin iyo taageero ku saabsan waalidnimada. Waad weydiin kartaa waxyaalo badan, laga bilaabo werwerka caafimaadka ilmaha iyo koritaankiisa, ilaa sida loo wajahaayo dhibaatooyinka maalinlaha ah. Meelo badan oo Iswiidhan ah ayay BVC ku taalaa xarumaha Familjecentral. Waxay isku dhagan yihiin BVC ga, inta badan daryeelka hooyada, xadaanad iyo adeega bulshada oo kaalmeeya.

Xarunta daryeelka carruurta waxa uu leeyahay masuuliyada caafimaadka iyasoo inta badan wadashaqeyn la leh adeegyada kale sida tusaale ahaan xadaanada, daryeelka caafimaadka carruurta, daryeelka ilkaha iyo adeega bulshada.

Waxaanu si diiran idiinku soo dhaweynaynaa BVC ga.

# Buugan caafimaadka waxa leh

(Denna hälsobok tillhör)

Magaca ilmaha oo dhan .....  
(Barnets fullständiga namn)

Lambarka shakhsiga.....  
(Personnummer)

Cinwaanka .....  
(Adress)

Goobta uu ku dhashay .....  
(Födelseort)

Miisaanka uu ku soo dhashay ..... Dhererka uu ku soo dhashay .....  
(Födelsevikt) (Födelselängd)

Intuu wareega madaxu leegyahay .....  
(Huvudomfång)

Taariikhda lagu ..... qorey BVC .....  
(Inskrivningsdatum) (vid BVC i)

**Kalkaalisada masuulka ka ah BVC** (Ansvarig sjuksköterska på BVC)

Magaca .....  
(Namn)

Xiliyada qaabilaada .....  
(Mottagninstider)

Lambarka telefoonka iyo xiliyada telefoonka .....  
(Telefonnr och telefontid)

Taariikhda lagu ..... qorey BVC .....  
(Inskrivningsdatum) (vid BVC i)

**Kalkaalisada masuulka ka ah BVC** (Ansvarig sjuksköterska på BVC)

Magaca .....  
(Namn)

Xiliyada qaabilaada .....  
(Mottagninstider)

Lambarka telefoonka iyo xiliyada telefoonka .....  
(Telefonnr och telefontid)

Taariikhda lagu ..... qorey BVC .....  
(Inskrivningsdatum) (vid BVC i)

**Kalkaalisada masuulka ka ah BVC** (Ansvarig sjuksköterska på BVC)

Magaca .....  
(Namn)

Xiliyada qaabilaada .....  
(Mottagninstider)

Lambarka telefoonka iyo xiliyada telefoonka .....  
(Telefonnr och telefontid)

# Telefoonada muhiimka ah

(Viktiga telefonnummer)

Lambarka gurmadka degdega (wadanka oo dhan aan u baahneyn lambarka degaanka)	112
Macluumaadka sunta ee gargaarka degdega	112
Macluumaadka sunta arimaha aan degdeg aheyn (xiliyada xafiiska ama la xidhiidh vårdcentral kuugu dhow)	08-33 12 31
Lambarka talobixinta caafimaadka (wadanka oo dhan aan u baahneyn lambarka degaanka, habeen iyo maalinba la helo)	1177

# Bogagga internetka ee muhiimka

(Viktiga internetsidor)

1177 Bogga Carruurta iyo waalidiinta ee mawduucyada kala leh	<a href="http://www.1177.se">www.1177.se</a>
Caawimada naas nuujinta	<a href="http://www.amningshjalpen.se">www.amningshjalpen.se</a>
Hay'ada cuntada	<a href="http://www.livsmedelsverket.se">www.livsmedelsverket.se</a>
Xarunta macluumaadka sunta	<a href="http://www.giftinformationscentralen.se">www.giftinformationscentralen.se</a>
Hay'ada Kiimikada	<a href="http://www.kemikalieinspektionen.se">www.kemikalieinspektionen.se</a>
Trafikverket	<a href="http://www.trafikverket.se">www.trafikverket.se</a>
Barnombudsmannen	<a href="http://www.barnombudsmannen.se">www.barnombudsmannen.se</a>

# Diiwaanka caafimaadka carruurta ee Iswiidhan

(Svenska Barnhälsovårdsregistret)

Si markasta looga sii wanaagsanaado ayaanu xaruntan qeyb ka mid ah macluumaadka ilmahaaga ku wargalineynaa Diiwaanka caafimaadka carruurta ee Iswiidhan. Waa hay'ad qaran oo tayada diiwaan galisa. Waxay kaa caawinaysaa in la abuurto daryeel ilmaha oo ka wanaagsan kana siman, iyadoo aan loo egeeyn meesha aad degan tahay.

## **Macluumaadka ayaa sidoo kale loo isticmaalaa cilmi baadhis**

Waxaanu so ururinaa macluumaadka sanadadda uu ilmahu la kulmo daryeelka BVC -ga, inta u dhaxeysa dhalashada iyo 5 sanno jirka. Waxaanu isku soo ururinaa macluumaadkaas iyadoo aan ilmaha la soo saari karin gofka uu yahay.

## **Waxyalo kooban oo ku saabsan xuquuqdaada**

- Ka qeyb qaadashadaada ayaa ah mid aan qasab ahayn iyadoo aan saameyn u keeneyn adeega aad ka helayso BVC-ga.
- Waxaad adigu diidi kartaa marka aad doonto. U sheeg markaa kalkaalisadaada BVC joogta.
- Haddii aad kadib is qoomameyso oo aanad rabin inaad diiwaankan ka qeyb qaadato ayaad xaq u leedahay in macluumaadkaaga la tirtiro.
- Dhamaan macluumaadka waxa ilaalinaaya sharciga Iswiidhishka iyadoo macluumaadka kaliya loo isticmaali doono horumarinta daryeelka caafimaadka iyo cilmi baadhis.
- Cida kaliya ee arki karta macluumaadka ilmahaaga waa cida ka masuulka diiwaanka iyo kalkaalisooiyinka jooga xarunta qaabilaada ee BVC-gaaga.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaanka waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee diiwaanka

[www.bhvq.se](http://www.bhvq.se)

## Barnaamijka da'da ee BHV (Koox=kalkaalisooyin iyo dhakhaatiir)

Da'da ilmaha.	Shaqaalaha	
0-14 maalmood	Kalkaalisada	Booqashada guriga
4 todobaad	Kooxda	
8 todobaad	Kalkaalisada	
2,5-3 bilood	Kalkaalisada	Talaalka
4 bilood	Kalkaalisada	
5 bilood	Kalkaalisada	Talaalka
6 bilood	Kooxda	
8 bilood	Kalkaalisada	(Booqashada guriga)
10 bilood	Kalkaalisada	
12 bilood	Kooxda	Talaalka
18 bilood	Kalkaalisada	Talaalka
2,5 iyo 3 sanno	Kalkaalisada/Kooxda	
4 sanno	Kalkaalisada	
5 sanno	Kalkaalisada	Talaalka

### Heshiishka caalamiga ee carruurta

Shaqada daryeelka caafimaadka carruurta waxay ka shidaal qaadanaysaa Heshiishka caalamiga ee carruurta iyadoo waxa ilmaha dantiis ahmiyada la saaraayo.

- Dhamaan carruurta waxay leeyihiin xuquuqda isku midka ah iyadoo isku qiimo ah. Cidna inay cid kale takoorto ma aha.
- Dhamaan go'aan kasta oo ilme qaabilsan ayaa ilmaha waxa dantiisa ah ay tahay muhiimad koowaad.
- Ilme kastaa waxa uu leeyahay xuquuqda nololsha iyo horumarka.
- Ilme kastaa waxa uu leeyahay xuquuqda uu ku sheegayo fikradiisa iyadoo ay tahay in la dhageysto.

(Mabaadiida ugu weyn ee Heshiiska Qaramada Midoobay ee xuquuqda carruurta)

Heshiiska waxay Qaramada Midoobay ku nuuxnuuxsatey in labada waalidka/masuulka ay leeyihiin mas'uuliyadda aasaasiga ah ee barbaarinta iyo horumarka ilmaha.

Masuuliyadaasi waa ay sii jireysaa ilaa ilmahu uu noqdo, iyadoo ku xidhan sida ay xaalada qoysku isku badesho. Waalidnimadu waa heshiis noloshoo dhan ah oo leh xeerar gaar ah sideed iyo tobanka sanno ee ugu horeeya. Bulshadu waxay leedahay masuuliyad gaar ah oo inay taageero siiso waalidka iyo carruurta. Waalid ahaan ayaa heshiiska loo isticmaali karaa si loogu ilaaliyo xuquuqda ilmahaaga iyo ta kuwa carruurta kale, tusaale ahaan marka laga hadlaayo xadaanada, dugsigu, daryeelka caafimaadka ama xaaladaha dhaqaalaha, guriga iyo bay'ada.



# Waxa wanaagsan in la ogaado booqashada BHV ka hor

(Bra att veta inför besöket på BHV)

## **Baadhitaanada**

Sida caadada ah ayaa ilmaha la baadhi doonaa oo la miisaami isagoo aan dhar xidhneyn. Caruurta waaweyn ayaa lagu sameynayaa baashitaanka iyagoo xidhan nigis/kalsoon. Inta badan waxa ay buuqashadu ka dhacdaa xarunta qaabilaada, laakiin ayaa marmarka qaar ka dhacdaa guriga.

## **Wadahadalka caafimaadka**

Daryeelka carruurta waxa uu waalidka marar badan usoo bandhigayaa wada hadal caafimaad iyo hadhow xataa ilmahu, marka laga eegaayo horumarka iyo koritaanka ilmaha.

Ujeedadu waxa weeye in waalidka la siiyo taageero/macluumaad ka dhiga qaar sameeya doorashooyinka caafimaadka leh oo horumar wanaagsan u keenaaya ilmah, saldhigna u noqonaaya caadooyinka wanaagsan ee nolasha. Waxa uu wadahadalku ku jira waxay khuseeyaan caadooyinka maalinlaha ee goyska iyo waxqabadyada joogtada sida tusaale ahaan caadooyinka cuntada-iyo dhaqdhaqaaqa. Taas waxa xataa ka mid ah wadahadalka ku saabsan sida ciyaaraha, hurdad iyo cabitaanka sigaarka iyo khamrada ee ilmaha agtiisa. Si looga hor taggo shilalka ayaa sideo kale ah qeyb muhiim ah.

## **Kooxda waalidiinta ee - COPE**

Kooxda waalidiinta aya soo qaban qaabineysa daryeelka carruurta halkaas oo laguugu soo ban dhigaayo inaad waalidka kale is barataan oo aad ka wada doodaan su'aalaha kala duduwan ee sida waalid nimadda, baahida ilmaha iyo horumarka. Waxa familjecentral laguugu soo ban dhigayaa taageero kala duduwan oo waalidka.

## **Ilmaha u soo diyaari booqashada.**

Waxa muhiim ah oo wanaagsan haddii aad adigu waalid ahaan ilmaha u soo diyaarisoo booqashada BVC-da.

**[www.1177.se](http://www.1177.se) – Other Languages – Soomaali**

# Koriinka carruurta (Barnets utveckling)

Boggagan ayaa loo isticmaali karaa si loola socdo talaabooyinka kala duduwan ee koritaanka ilmaha. Waxaad qori kartaa waxyaalaha cusub ee uu barto waxa uu xiiseeyo iyo sidoo kale si aad sawir ilmaha ah uga bixiso xiliga booqashada BVC-ga iyo xadaanada. Haddii aad ka werwersan tahay ama aad wax iska weydiinayso koritaanka ilmaha la hadal markaa kalkaalisada joogta BVC-ga.

Da'da ay dhacdooyinka dhaceen. Ilmaha ...

- ... isha ku hayo .....
- ... kula qoslaaya .....
- ... madaxa isku dheeli tir .....
- ... si buuxda u qabsanaaya sangadha kadib ama alcaabta .....
- ... bilaabaaya inuu hadaaqo .....
- ... madaxa la raacaaya codka .....
- ... wax gacanta ku kala wareejin kara ....
- ... is rogaaya .....
- ... fadhiisanaaya taageero la'aan .....
- ... guurguurad iyo sirbixasho.....
- ... kaligii kor u fadhiisanaaya .....
- ... iliga ugu horeeya .....
- ... kor isku taagaaya .....
- ... alaabta guriga ku soconaaya .....
- ... fahmaaya kalmad kalmad .....
- ... macasalaama odhanaaya .....
- ... dhowr talaabo qaadaaya isagoo aan waxba cuskan.....
- ... si amaan ah u socda isagoon waxba cuskan .....

- ... kaligii wax cunaaya (malqaacd wax ku cunaaya) .....
- ... wax xarxariqa.....
- ... orodka .....
- ... dhahaaya kalmad fudud ee labada.....
- ... isku dhahaaya “aniga” .....
- ... laba lugood ku boodaaya .....
- ... “wax ku sheegaaya” jumlado 3-4 kalmadood ah .....
- ... jaran jarta fuuli kara .....
- ... sawira madax iyo mijo .....
- ... wadi kara baakiil saddex lugood leh .....
- ... dharka badalan kara (marka laga reebo badhamada iyo suunka.....
- ... wadi kara baaskiil laba lugood leh (aan wadan lugta taageerta) .....



# Cuntada (Mat)

## Naas nuujinta

Naas nuujinta ma aha kaliya cuntada ilmaha la siinaayo, ee waa qeyb ka mid ah xidhiidhka jidhka taas oo ah hab ilmaha lagula sheekaysto. Waxa ay taas micnaheedu tahay u dhawaansho, diirimaad iyo sugnaan.

Caanaha naaska ayaa nafaqo ahaan si gaar ah loogu talo galay adiga ilmahaaga. Waxa ku jira waxyaalo ay ka mid yihiin maadooyinka ka ilaalinaaya infegshanka. Ilmo dhargey, qanacsan oo si wanaagsan u koraaya ayaa caanaha naasku si fiican ugu filan yihihiin lixda 6 bilood ee ugu horeeya. Waxa kaliya ee ka maqan waa fiitamiin-D kaas oo ilmaha laga siinaayo dhibcaha-D.

Carruurta waxay ay cuntaa qadar kala duduwan, xiliyo kala duduwan iyo inta jeer oo kala duduwan. Sida naas nuujinta adiga iyo ilmahaaga idiin tahay ayaa gaar ah. U naas nuuji sida ilmahaaga, adiga iyo qoyska intiisa kale ugu haboon.

## Marka aanad naasnuujineyn

Haddii aanad sameyn karin ama aanad rabin inaad naas nuujiso ilmahaaga ayay wanaagsan tahay in naas nuujinta loo eekeysiiyo sida ugu suurtogalsan. U ogolow in ilmahu uu dareemo diirimaadka jidhkaaga adigoo qaawanaan caloosha caloosha ugu saaraaya. Waxa wanaagsan in lagu dadaalo in waalidka oo kaliya ay marka hore ilmaha afka cuntada ugu guraan haddii ay taasi suurtogal tahay. Waxey dhib yaraynaysaa wada xidhiidhka ka dhaxeeya ilmaha iyo waalidka ay xiliyad ugu horeeya ee ilmaha iyo waalidku wada xidhiidhka isku baranayaan.

BVC waa inay taageerto oo ay kaa caawiso wayaalaha talooyinka sida wax loo sameeyo marka aad ka fikireyso waxyaalaha ku saabsan in musaasada wax lagu siiyo.

## Fiitamiin -D

Dhamaan carrurutu waa inay helaan fiitamiin-D labada sanno ee ugu horeeya. Carruurta qaar ayaa u baahan inay sii isticmaalaan fiitamiin-D ga xataa labada sanno ee hore ka dib. Waxa inta badan loo jeedaa:

- Carruurta maqaarka madow, maadaama oo uu midabkoodu keenaayo in ay fiitamiin-D ka yar maqaarka ku sameysmo.
- Carruurta aan aadin dibada inta badan ama xataa xiliyada xagaaga, xidha dhar badan oo qariya wajiga, gacmaha iyo lugaha marka ay dibada joogaan.
- Carruurta aan la siin cuntada lagu soo qasay fiitamiin -D, tusaale ahaan caanaha khafiifka, caanaha dhexdhexaadka iyo subdada margariinta.
- Carruurta aan cunin kaluunka.

Haddii aan la hubin in ilmahaagu uu u baahan yahay inuu sii wato qaadashada fiitamiin-D ga iyo in kale, ayay ka wanaagsan tahay in mid la siiyo halkii aan la siin laheyn.

## **Dhadhamo yaryar ayaa lagu bilaabi qiyaas ahaan 6 bilood**

Marka ay lix gaadhaan ayay tahay xiligii ilmaha la qabadiisii lahaa inuu cuno cunto caadi ah. In la barto cunitaanka cuntada ayaa ah hab tartiib tartiib u dhaca. Bilowga hore kaliya waxa weeye inuu ilmahu la qabsado waxyaalaha cuntadu ka kooban tahay, dhadhamo kala duduwan, in malqaacad wax lagu cuno iyo inuu barto dhaqdhaqaaqa calaliska. Sii wad inaad xiligan sidii caadiga aheyd ugu sii naas nuujiso ama aad ugu sii siiso caanaha carruurta. Maadaama oo caanaha naasku iyo badelkooda ay ku jiraan nafaqo badan ayaanad ugu baahneyn inaad ka werwerto haddii uu ilmahu uu qunyar hore ugu socdo.

Marka uu ilmahu rabo wax dhadhamo ah oo ka weyn ayaa tartiib tartiib loogu kordhiyaa ilaa cunto dhan. U ogolo in xiisaha ilmahu uu u qabo cuntada uu xukunto sida wax loo siinaayo. Kaidb marka uu ilmahu gaadho toban ilaa laba iyo toban bilood, ayaa loo baahan yahay in maalintii laba jeer wax la cuno iyo waxoogaa cunto fudud ah oo u dhaxeysa. Ilmaha yar ayaa hore uga geysb qaadan doona marka qoyska intiisa kale wax cunayaan, carruurta wax badan ayay ka bartaan inay ku deyaan xubnaha qoyskooda kuwaas oo ah qof caadi ahaan ay ku daydaan. In wax la wada cuno ayaa caadi ah iyo sidoo kale niyada cuntada ayaa is bedbedesha. Iska ilaali inaad amaanto marka uu ilmahu wax cuney ama inaad xanaaqdo haddii ilmahu aanu waxba cunin.

## **Dhadhamo yaryar**

Carruurta qaar ayaa xili hore xiiseeya cuntada. Ugu horey laga bilaabo da'da afar bilood ayaa ilmaha u ogolaa kartaa inuu cuntada caadiga ah dhadhamiyo, ilaa inta ay tahay qadar yar oo aan la tartameyn naas nuujinta.

## **Iska ilaali kolba waxyar cunida**

Xasiida, saanwijka, sabiib, iwm ayaa loo arki kara wax ku habboon in la siiyo si loo mashquuliyo ilmaha marka uu ku jiro gaadhiga ama in lagu aamusiyo. Laakiin ilkaha ilmaha uma wanaagsana ama rabitaanka cuntada in markasta afka wax lagu hayo. In la siiyo cabitaanada macmacaan sida casiirka waa inaad dhamaan ka ilaaliso. Waxa muhiim ah in ilmahu uu marka hore la qabsado si uu biyaha iskugu haraad bixiyo.

Wax dheeraad ah oo naas nuujinta iyo cuntada ku saabsann ka sii akhri boggagan soo socda.

[www.1177.se](http://www.1177.se) – Other Languages – Soomaali

[www.livsmedelsverket.se](http://www.livsmedelsverket.se)

[www.amningshjalpen.se](http://www.amningshjalpen.se)



# Caafimaadka ilmaha (Tandhälsa)

Habka ilaalinta caafimaadka ilkaha waxa la aasaasaa xiliyada ugu horeeya ee nolasha ilmaha. Carruurta si ka dhibyar ayuu suusku ilkahooda u galaa. Daryeelka ilkaha ayaa sidaas daraadeed ku siinaaya talolyinkan soo socda ee ku saabsan daryeelka ilkaha iyo caafimaadka ilkaha.


- Ilkahu la qabsado inuu cabo biyaha marka uu haraado.
- Shan jeer in wax la cuno ayaa caadi u ah marka laga bilaabo sariid jirka. Saddex jeer oo cunto buuxda iyo laba cunto fudud.
- Ilmaha sii cabitaan marka ay waxoogaa xaflad ahi jirto, marna haku siin masaasada.
- Xadee cunitaanka nacnaca oo ka dhig maalin kaliya todobadkii iyadoo aad siineyso nacnaca aan macaanka laheyn.
- Iskiriinka iyo waxa kale ee macmacaan ayaan dhaawac sdiiaas u badan laheyn, haddii ilmaha la siiyo cuntad aka dib.
- Marka aanu ilmahu naaska laga joojiyo, ka ilaali inaad siiyo cunto iyo cabitaan habeenkii – iyadoo aanad marnaba siineyn marka uu dhafo hal sanno.
- Haddii aad wali naaska sii siinayso hal sanno ka dib, ka ilaali “nuujinta” isku dhowdhow.
- Dawada cadeyga ee ay falooriintu ku jirto ugu cadey ilkaha aroortii iyo habeenkii, qiyaas ahaan in faryarada carrurta leeg.
- Ilmaha ka caawi cadeyga ilka ilaa uu gaadhaayo 9-10 sanno jir.

## Dhaawaca ilkaha

Qiyaas ahaan labadii carruur ahba mid ayaa marka mid ah koritaankiisa uu ku dhici karaa shil waxgaadhsiya ilkahiisa.

Waxa muhiim ah in si dhakhso ah wax looga qabto dhaawaca ilkaha. Sidaas darteed la xidhiidh daryeelka ilkaha haddii ilmahagu ay soo gaadhaan dhaawayo ilkaha ah.

## Xiligee ayaa ilka caanaha la helayaa



# Booqashada koowaad ee guriga

## 0–14 maalmood (1:a hembesöket 0–14 dagar)

### Noocyada wadahadlka inta badan yimaada:

Sida uu qoysku dareemaayo iyo siday tahay xaalada gurigu ee ilmaha yar ee soo dhashay.

Waa sidee naas nuujintu ama caanaha daasada, Fiitamiin -D.

Sida uu ilmahu u hurdo iyo dhinaca uu u seexanaayo, kahortagga dhimashad kadiska ee ilmaha.

Wada xidhiidhka ilmaha, sida la iskugu dayaayo in la fahmo waxa uu ilmahu rabbo marka uu qaylinaayo.

Waxa la sameynaayo haddii uu ilmahu xoog u qeyliyo. Waxa maxay khidadla la yeelanaayo haddii aad ku wareerto oo aad ka xanaaqdo qeylada badan ee aan la aamusiin karin ilmahaaga.

Sida loo heli karro caawimo marka la dareemaayo inay waalidnimadu adag tahay.

Badbaadada ilmaha sida tusaale ahaan waxa laga fikiraayo marka miiska lagaga badalo uu saaran yahay ilmahu iyo marka gaadhiga la saaran yahay.

Sida ay cabitaanka knamrada- iyo tubaakadu u saameeyso ilmaha.

Khataraha infegshanka

Daryeelka ilmaha iyo qalabka.

Dibad joogista

Waxa ay BVC- gu kuu qaban karto.

Su'aalahaaha iyo waxyaalaha aad ka fikireyso.

Kalkaalisada ayaa sameynaysa diiwaanka caafimaadka ilmaha halkaas oo lagu qoraayo waxyaalaha khuseeya caafimaadka ilmaha.

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....



# Baadhitaanada caafimaadka

(Hälsundersökning, 2–8 veckor)

Waxa lala kulmaa kalkaalisada joofta BVC -ga todobaadkii ama labadii todobaadba hal mar taas oo ku xidhan baahida. Waxa halkaas lagaga hadlaa waxyaalo badan oo ku saabsan horumarka ilmaha iyo caafimaadka. Kalkaalisada ayaa sidoo kale la soconeysa koritaanka ilmaha iyadoo qiyaaseysa oo miisaameysa.

Marka uu ilmahu yahay 6-8 todobaad ayaa hooyada loo soo jeedinayaa su'aalo khuseeya sida tahay iyadu. Waxa sidoo kale la buuxinayaa foom su'aalo ah oo sid la dareemaayo ah. Niyad-jabka ayaa caadi ah dhowr maalmood foosha ka dib iyadoo marmarka qaarkood noqon kara dareen dheer oo niyad-jab keeni kara. Taasi waxay ku dhici kartaa labada waalidba. Si aad caawimada saxa ugu hesho waa in loo sheego sida la dareemaayo kalkaalisada BVC-ga.

## **Su'aalaha inta badan jooftada ee loo arko inay muhiim yihiin in laga hadlo xiliga booqashada waa tusaale ahaan:**

Sida aad idinku waalid ahaan dareemeysaan?

Maxaa dhacay ilaa markii ugu danbeeyey?

Waxqabadka maalinlaha, daryeelka iyo hurdada?

Waa sidee naas nuujintu/cuntada kale?

Xidhiidhka ka dhaxeeya adiga iyo ilmaha?

Dibad aadida?

Xiligan ayaad dareemi doontaan in ilmahu kolba wax ka sii badan uu bay'adiisa xiiseynaayo:

- isku dey inaad canjiso oo aad adigu isla hadasho.
- isha kula raacaaya marka aad la xidhiidhyso.
- u qosol

Waxa laga yaabaa inaad qabto waxyaale kale oo in la soo qaad aad muhiim u aragto? Markasta ku soo dhawow kalkaalisada BVC-ga haddii aad dareemeyso warar ama aad wax ilmahaaga khuseeya is weydiinayso. Su'aalna ma aha mid yar ama aan muhiim aheyn in la soo qaado.

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....  
.....

# Koox booqasho soo sameynaysa dhakhtar iyo kalkaalisada, 2 1/2–3 sanno

(Teambesök läkare och sjuksköterska, 4–6 v.)

Baadhitaankan caafimaadka waxa sameynaaya dhakhtar iyo kalkaaliso ka socota BVC-ga. Koritaanka maskaxda iyo jidhka ee ilmah ayaa la baadhayaa si wixii dhibaato ah hore loogu ogaado oo wax looga qabto. Dhakhtarka ayaa sharaxaaya sida loo sameynaayo baadhitaanka.

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....

.....

## Baadhitaanada caafimaadka, 3-4 bilood

(Hälsoundersökning, 3–4 månader)

Baadhitaanka caafimaadka ayaa kalkaalisadu sameynaysaa caadi ahaan hal mar bishii, ama wax ka badan haddii loo baahdo. Waxa halkaas lagaga hadlaa waxyaalo badan oo ku saabsan horumarka ilmaha iyo caafimaadka. Sida aad idinku waalid ahaan dareemeysaan. Waxa lala soconeysa koritaanka ilmaha iyadoo la qiyaaseysi oo miisaami doono. Marka saddex bilood la gaadho ayaa sida waafaqsan barnaamijka lagu soo bandhigi talaalka. Waxa wanaagsan in waalid ahaan la isku soo diyaariyo talaalka. Waxa la weydiin karaa BVC-ga haddii laga werwersan yahay. Waxa wanaagsan haddii uu ilmahu dharagsan yahay oo uu soo nastey talaalka ka hor. Waxa wanaagsanaan karta in loo soo qaado caruusada ilmahu uu jecel yahay.

### **Mawduucyada kale ee caadi ahaan laga hadlo waa:**

Sida ay tahay xaalada gurigu iyo sida la dareemeyo, sida waxqabadka ilmahu u shageynaayo.

Cuntada iyo hurdada.

Sida uu wada xidhiidhka ilmahu u shaqeeyo, sida la iskugu dayaayo in la fahmo waxa uu ilmahu rabbo marka uu qaylinaayo.

Sida uu ilmahu uga jawaab celiyo xaaladaha kala duduwan, haddii uu ilmaha ay ku adag tahay in la aamusiyo, waxa uu ilmahu jecel yahay iyo waxa aanu jecleyn.

Badbaadada ilmaha.

Sidee ayuu ilmahu codka, muusiga iyo qeylad weyn ugu jawaab celiyaa.  
Dibad joogista

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....

.....

.....

## Baadhitaanada caafimaadka, 5 bilood

(Hälsoundersökning, 5 månader)

Baadhitaankan caafimaadka waxa sameeyaa kalkaalisada joogta BVC-ga marka uu ilmahu yahay 5 bilood jir. Xiligaas ayaanu ka hadalnaa xidhiidhka ka dhaxeeya adiga iyo ilmaha? Koritaanka iyo horumarka ayaa lala soconayaa. Cuntada iyo shilalka ayaa ah arimaha jooga. Xiligaas ayaa sidoo kale la siinayaa talaalka sida waafaqsan barnaamijka. Waxa wanaagsan in waalid ahaan la isku soo diyaariyo talaalka. Waxa la weydiin karaa BVC-ga haddii laga werwersan yahay. Waxa wanaagsan haddii uu ilmahu dharagsan yahay oo uu soo nastey talaalka ka hor. Waxa wanaagsanaan karta in loo soo qaado caruusada ilmahu uu jecel yahay.

### Su'aalaha caadiga ah ee wadhadalka/mawduucyada:

Sidee ayaad idinku waalid ahaan dareemeysaan? Maxaa dhacay ilaa markii ugu danbeeyey?

Sheeg waxa uu ilmahiinu jecel yahay iyo waxa aanu jecleyn.

Sidee ayuu ilmahu u dhaqdhaqaaqaa.

Miyuu ilmahu hadaaqayaa wax ka badan, sameynayaa codad ka badan?

Waa sidee cuntada iyo hurdada?

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....

.....

.....

.....



# Booqashada kooxda dhakhtar iyo kalkaalisada, 6 bilood

(Teambesök läkare och sjuksköterska, 6 månader)

Baadhitaanka caafimaadkan oo ay sameynayso kalkaalisada joogta BVC-ga iyo dhakhtar ayaa ahmiyad la saarayaa sida uu ilmahu u dhaqdhaqaaqayo oo uu bay'adiisa ula dhaqmaayo.

## Su'aalaha caadiga ah ee wadhadalka/mawduucyada:

Sidee ayaad idinku waalid ahaan dareemeysaan? Maxaa dhacay ilaa markii ugu danbeeyey?

Miyuu ilmahu eegayaa qofka hadlaaya? Miyuu ilmahu ka jawaab celiyaa qeylada weyn?

Miyuu ilmahu ku hadaaqayaa codad ka badan kuwii hore?

Waa sidee cuntada iyo hurdada?

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....

.....

# Baadhitaanada caafimaadka, 7-10 bilood

(Hälsoundersökning, 7-10 månader)

Baadhitaankan caafimaadka waxa sameynaaya kalkaalisadaada joogat BVC-ga.

Kalkaalisada ayaa eegeysa sida uu ilmahu ula dhaqmaayo bay'adiisa, haddii uu ilmahu isha kula xidhiidhayo, qosol ku jawaab celinaayo ama hadaaqayyo oo uu hadaaqayyo sida uu ilmahu wax u baadhaayo. Waxa sidoo kale la eegayaa inuu ilmahu cawaran yahay. Waxa sidoo kale laga wada hadlayaa amaanka ilmaha.

Fiiri liistada warbixinta shilalka!

## Su'aalaha caadiga ah ee wadhadalka/mawduucyada:

Sidee ayaad idinku waalid ahaan dareemeysaan?

Maxaa dhacay ilaa markii ugu danbeeyey?



Miyaad is leedihiiin ilmahu saani ayuu wax u maqlayaa? Ma codad badan ayuu ilmahu ku hadaaqaa hadda marka la garb dhigo markii hore iyadoo laga yaabo inuu canjilo kalmadaha caadiga ah?

Waa sidee cuntada iyo siduu u seexdo ilmahu?

Waa sidee bixitaanka banaanku?

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay:

.....  
.....



## Booqashada kooxda dhakhtar iyo kalkaalisada, 12 bilood

(Teambesök läkare och sjuksköterska, 12 månader)

Baadhitaanada caafimaadka ee ilmahu ayaa xiligaa ay sameyn doonaan kaalisada joogta BVC-ga iyo dhakhtar. Waxa ahmiyad la saarayaa sida uu ilmahu u dhaqdhaqaaqayo oo uu bay'adiisa uga dhaqmaayo.

Maqalka iyo hadalka ayaa muhiim ah in loo fiirsado iyo sidoo kale caadooyinka cuntada ee wanagsan. Hadda waa xiligii talaalka saddexaad sida waafaqsan barnamijka.

Fiiri liistada warbixinta shilalka!

### **Su'aalaha caadiga ah ee wadhadalka/mawduucyada:**

Sidee ayaa idinku waalid ahaan dareemeysaan? Maxaa dhacay ilaa markii ugu danbeeyey?

Sheeg waxa uu ilmahiinu jecel yahay iyo waxa uu neceb yahay?

Miyaad is leedihiiin ilmahu saani ayuu wax u maqlayaa? Waa sidee barashada hadalka ee ilmahu?

Sidee ayuu ilmahu wax u cunaa? Sidee ayuu ilmahu u seexdaa?

Ilkaha iyo caafimaada ilkaha.

Badbaadada ilmaha.

Fasaxa waalidka/daryeelka ilmaha.

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....  
.....

# Baadhitaanada caafimaadka, 18 bilood

(Hälsoundersökning, 18 månader)

Baadhitaankan waxa sameynaaya kalkaalisadaada joogat BVC-ga. Taasi waa wakhti ay tamarta iyo xiisah cuntad ee ilmahu uu yahay mid aan dhamaan. Xiligaad ayaa maqalka, hadalka iyo wada xidhiidhu uu yahay muhiim u baahan in loo fiirsado iyo sidoo kale caadooyinka cuntada. Taasi sidoo kale waa xiligii la siinaayey sida waafaqsan barnaamijka.

Fiiri liistada warbixinta shilalka!

## **Su'aalaha caadiga ah ee wadhadalka/mawduucyada:**

Sidee ayaad idinku waalid ahaan dareemeysaan? Maxaa dhacay ilaa markii ugu danbeeyey?

Sheeg waxa uu ilmahaagu jecel yahay iyo waxa aanu jecleyn.

Miyaad is leedihiin ilmahu saani ayuu wax u maqlayaa?

Waa sidee cuntadu? Waa sidee hurdada?

Miyuu ilmahu bilaabay inuu socdo/fuulo?

Waa sidee wakhtiga dibad lagu soo ciyaarsiinaayo?

Waxyaalaha kale ee la dareemaayo in ka hadalkoodu muhiim yahay: .....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....

.....



# Baadhitaanada caafimaadka, 2 1/2–3 sanno (Hälsoundersökning, 2 1/2–3 år)

Booqashadan waxa la sameynayaa qiimeyn horumarka luqada ee ilmaha ah.

